

DULSAARKA SHACABKA IYO Xaaladda Degdegga ah ee COVID-19

(macluumaadka ugu danbeeyay ee 4-22-20)

Daryeelka Caafimaadka iyo Dulsaarka Shacabka:

Maadaama oo ay jirto xaaladan degdegga ah ee COVID-19, Waaxda federaalka ee Amniga Arrimaha Gudaha iyo USCIS waxay si cad u bayaamiyeen shaybaadhka, daawaynta iyo kahortagga la xidhiidha COVID-19 in [aan](#) loo tixgalin inay ka qayb yihiin dulsaarka shacabka, sidii la doonaba ha loo bixiyo lacagta shaybaadhka iyo daawaynta eh.

Oregon Health Plan, oo uu ku jira Cover all Kids iyo CAWEM-Plus Pregnancy waxa uu si buuxda u bixiyaa kharashka dhan ee shaybaadhka COVID-19 iyo daawayntiisa. Medicaid Xaalada degdegga ah ee Oregon (CAWEM, waxa heli kara dadka waawayn ee dakhligoodu hooseeyo, ee aan uurka lahayn ee Oregon deggan kuwaas oo aan u qalmin OHP sababo soo galeyntinimada ah dartood) waxaa si buuxda looga bixinayaa shaybaadhka COVID-19 ee qolka xaalada degdegga ah, oo waxaa kadib laga bixinayaa daawaynta COVID-19. Daawaynta ay bixiyaan lacagta wixii barnaamijyadan ah **loolama** dhaqmayo sidii shaybaadhka dulsaarka shacabka oo kale.

Caymiska Bilaa Shaqada, Lacagaha Kaabista Dhaqaale, iyo Dulsaarka Shacabka:

Caymiska bilaa camalka **looma** arko gunada shacabka oo markaa marna kama uu mid ahayn shaybaadhka Dulsaarka Shacabka.

Lacagta la bixinayo ee lagu kaabayo Coronavirus-ku **looma arko** inay kamid yihiin shaybaadhka Dulsaarka Shacabka. Lacagta Kaabista waxa loo arkaa inay yihiin daynta cashuurta, oo daynta cashuurtana marnaba looma yaqaan shaybaadhka Dulsaarka Shacabka.

Khayraadka Kale ee Dulsaarka Shacabka:

Xasuuso in dad badan oo soo galayti ah laga dhaafay shaybaadhka Dulsaarka Shacabka, gunooyin badan loo yaqaan inayna ahayn shaybaadhka Dulsaarka Shacabka, oo gunada la siiyay caruurta soo galaytiga aan loo tirin waalidkood si ka dhan ah shaybaadhka dulsaarka shacabka gudaha Maraykanka. Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah waxaad ka eegtaa Waraaqaha Macluumaadka Dulsaarka Shacabka ee Causa, Oregon Latino Health Coalition, iyo Oregon Law Center [ee halkan](#) oo Ingiriisi ah, [halkan](#) oo Isbaanish ah, iyo [halkan](#) oo luuqado kale ah.

Wixii macluumaad ah ee kale ee noocyo badan oo gunada shacabka ah ee dadka soo galeyti ay heli karaan, waxa aad ka eegtaa tilmaamaha Dadka Soo Galaytiga iyo Gunada Shacabka [halkan](#), iyo tilmamaaha Khayraadka Shabakada Amaanka [halkan](#).

Kala hadal Khadka Tooska ah ee Oregon Law Center/Legal Aid Services ee Gunooyinka Shacabka Oregon wixii su'aalo ah ee ku saabsan gunooyinka shacabka iyo dulsaarka shacabka. 1-800-520-5292.